

# Tixraacida Deg-dega ah

Kireystaha Xuquuqiisa ee Gobolka North Dakota

## Kireystaha waxa uu xaquuq u leeyahay qodobada soo socda:

- Mulkiilaha guriga in aysan kaa goyn Karin korontada
- Mulkiilaha guriga In aysan kaa saari Karin guriga aad degan tahay adoon ogaansho u laheyn
- Mulkiilaha guriga in aysan kaa tuuri Karin alaabtaada ilaa iyo 30 maalmood guuritaan kaaga kadib.
- Mulkiilaha guriga in aysan xiri Karin ama badali Karin furaha guriga aad ku nooshahay adoon ogeyn.
- Mulkiilaha guriga in aad ka codsankarto in ay kuu suubiyaan meelaha ka haleysan guriga aad degan tahay.
- Mulkiilaha guriga aysan xoog kaaga saari Karin guriga aad degan tahay ayagoon ku siin wax digniin ah.
- Mulkiilaha guriga in ay ku siiyaan digniin macquul ah oo ay ku soo galaan gurigaaga, haddii laga reebo xaalad deg-deg ah sida dab iyo wixii lamid ah.

## Kireystaha waxaa waajib ku ah:

- Inuu dhiibo lacagta kirada waqtiga loogu tala galay.
- Inuu u cadeeyo Mulkiilaha guriga haddii ay jiraan dhaawac ku yimid meesha aad degan yahay.
- In aad ku xoorto qashinka meelaha loogu tala galey sida qashin ururiyaha.

## Kireystaha waxa uusan suubin Karin:

- Inuu joojiyo dhiibista kirada guriga asagoon wax digniin dhiibin.
- In aad iska gurto adigoo lasocodiisin Mulkiilaha guriga
- In aan lays kala sooci Karin iyadoo loo fiirinaayo meesha aad ka soo jeedo, nooca maqaarka aad leedahay madow, cadaan, midab furan, meesha aad ka timi markeedi hore, diinta aad heysato, ama haddii aad jirto 40 sanno iyo wixii ka sareeya oo da' ah, haddii aad qaadato gargaar, xaas leedahay iyo haddii kale, xaalada qoyska, haddii aad tahay curyaan ama howl gab.

## Kireystaha sababaha loogu diidi karo in uu guriga dego:

- Haddii lacagta ku soo gasha ay aad u yartahay
- Mulkiilaha guriga aad hore u daganeed oo tixraac xun kaa bixiyey.
- Haddii ay kuu diiban gashantahay in aad dambiile tahay.
- Haddii ay aaminaadaada ay xun tahay ama ay liidato.

# Tixraacida Deg-dega ah

Mulkiilaha Guriga aad degantahay Xuquuqdiisa ee Gobolka North Dakota

**Mulkiilaha Guriga aad degantahay Waxa uu awood u lee yahay in uu kaa saaro, haddii aad midkood haleysho qodobada hoos ku xusan:**

- xili walba oo lagu jiro haba ahaato xiliga “Winter” ee loo yaqaan “Jiilaal”
- Haddii uu noqdo guriga aad degan tahay mid aan nabad lagu tilmaami Karin ama uu noqdo mid aan nadaafad aheyn uuna wax yeelayn karo caafimaadka.
- In aad bixin weydo lacagta kirada
- Haddii aad kamid noqoto ama xiriir layeelato wax walba oo aan sharciga waafaqsaneyn sida daroogo isticmaalida hadana ka ganacsada.
- Falid danbi ama rabshe sameyn oo ka timaada dadka guriga wada degan
- Sameyn joogta ah Xaflad qeylo badan guriga aad degan tahay.
- Ku haysasho xayawaan guriga dhexdiisa adigoon amar u heysan.

**Mulkiilaha Guriga waxay awood buuxda u leeyihiin qodobada soo socda:**

- In ay gali karaan gurigaaga marka, ay jirto xaalad deg-deg ah ama waqtiyada macquulka ah, iyadoo heysta digniin.
- In uu kordhin karo kirada guriga isagoo ku siinayo digniin marka uu kuu dhamaan rabo heshiiska guriga
- In uu suubiyo dulsaarasho lacag haddii aad kirada guriga aad keeni weydo waqtiga loogu tala galey in aad ku bixiso.
- In uu tiro cayiman u sameeyo dadka guriga kugula nool.
- In uu lacag ganaax ku saarto haddii aad dhaawac u geysato ama aad nadiifin weydo goorta aad ka baxeyso guriga.

**Mulkiilaha Guriga waxaa waajib ku ah arimaha soo socda:**

- In uu kaa kireeyo guri hagaagsan oo sharciga iyo caafimaadka waafaqsan.
- In uu diyaariyo ama lasocdo biyaha, biyaha kulul, Kululeynta guriga, waxyaalaha qaaca sheega, in uu diyaariyo wax yaalaha qashinka lagu shubo.
- In uu si joogto ah unadiifiyo meelaha ay dadka maraan uuna ka ilaaliyo waxyaalaha dhibaataada keena.
- Marka aad guurto, in uu soo celiyo debaajada ama uu kuu sheego sawabta uu kugu soo celidoonin, bil guda heed.
- Waa in ay taalaa lacagta dibaaajida aad u dhigatay bangiyada dowlada ceymiska leh.

**Mulkiilaha Guriga xaq kuma lihid:**

- In uu kaa bixiyo kirada guriga hadaad curyaan tahay ama wixii lamid ah oo xaalad walba ah.